



Somaliska

Dhexdhexaadinta la sameeyo marka dembi dhaco – waa kulan wata fursad

Dhexdhexaadinta marka dembi dhaco waa mid tabbaruc ah (iskiis) waana kulan hoosaad u dhexeeya dembiilaha iyo dhibanaha. Waxeey la kulmayaan qof dhexdhexaad ka ah arrinta si looga wada hadlo dhacdaddi dembiga ahayd. Inta kulanka lagu guda jiro wuxuu dhibanuhu helayaa fursad uu sharaxaad kaga bixi karo xusuustiisa kusaabsan dhacdaddii dembiga iyo dhibka ay noloshiisa ku reebtay. Dhibbane waxaa kale oo uu weydiin karaa dembifalaha sababta uu dembigaas u sameeyay. Dembilaha wuxuu markiisa sharaxaad ka bixinayaa aragtidiisa ku aadan dhacdada dembiga iyo haddii dhacdadaas isaga wax saameyn ah ku yeelatay. Dhexdhexaadinta marka dembi dhaco la sameynaayo, waxaa loogu tala galay qofka dhibanaha ah iyo qofka dembifalaha ah labadaba. Ula jeedada dhexdhexaadintu waa in dhibanaha uu helaa fursad uu uga fekero ugana shaqeeyaa dhacdadaas faldembiyeedka ah, iyo in dembifalaha naftiisu dib isugu noqdo, gartana natiijada kasoo baxday wixii uu sameeyay. Marka dhexdhexaadintu dheceyso waxaa kale oo jirta fursad lagu qaabeyn karo heshiiska magdhowga.

Dhexdhexaadinta la sameeyo marka dembi dhaco waxay ku qorantahay xeerka dhexdhexaadinta (2002:445). Dembiga dhacay ee la dhexdhexaadinaayo waa inow yahay mid booliska loo gudbiyay, qofka dembiga galayna uu ama qirtay inow sameeyay dembiga ama ka qeyb qaatay. Arrinta dhexdhexaadin waxaa lagu sameey karaa heer kasta oo dacwadeed, waxeyna kabiid ama dhameystir u tahay hab-dacwadeedka maxkammaded. Dhexdhexaadintu ma ahan mid bedeli karta dacwada maxkammada caadiga ah ee waa garab socotaa.

Dhexdhexaadinta la sameeyo marka dembi dhaco degmada (kommunen) dadbaa masuul uga ah, waana wada shaqeyn u dhexeysa xafiiska arrimaha bulshada, booliska iyo xeer ilaaliyaha.

Laga bilaabo 1 janaayo 2008 xeerka dhexdhexaadintu wuxuu degmooyinka Swiidhan ku khasbayaa iney masuul iska saaraan in lagu casuumi karo dhexdhexaadin dembifalayaasha ka da yar 21 sano.